



# Dhul-siibadka iyo Dhoobo Qulqulka

**Dhul-siibadka (landslide) iyo dhoobo qulqulku (mudflow) badanaa waxay dhacaan digniin la'aan. Quwadda dhagaxaanta, carrada ama waxyaabaha kale ee meel hoobad ah ka soo dhaqaaqay waxay burburin karaan wax kasta oo jidkooda yaala.**

## Ka hor dhul-siibad

- Ha lagu sameeyo qiimeynta dhulka gurigaaga.
- Waxa laga yaabaa in jiyolooji-yahanka waaxda qorsheynta ee degmaadu uu hayo macluumaad gaar ah oo ku saabsan aagga u nugul dhul-siibadka. La tasho xirfadle khabiir ku ah farsamada jiyoloojiga oo ha ku siiyo talo ku saabsan tabo sixitaan oo la qaadi karo.

## Caymis

- Qulqulka dhoobada waxa daboolaa qodobada caymiska ee Barnaamijka Caymiska Daadka ee Qaranka (National Flood Insurance Program). Caymiska daadka waxa laga iibsaa wakaalad caymis oo degmada ah.

## Yaree halisyada guriga

- Dhir dabooosha dhulka ku beer tiirta ama hoobadka si loo xasiliyo dhulka, oo dhis derbiyo wax xejiya.
- Dhis marinno ama derbiyo weecin si ay qulqulka uga weeciyaan dhismeyaasha.
- Haddii aad dhistid derbiyo si aad u weecisid waxa qulqulku wato oo wixii qulqulku watay ay galaan mulkiga deriska, waxa laga yaabaa inaad mas'uul ka tahay khasaaraha.

## Samee qorsheyaal bixid/qaxid

- Qorshee ugu yaraan laba jid bixid ama qaxid sababta oo ah waxa laga yaabaa in jidadka xanibmaan ama xidhmaan.

## Baro inaad garatid calaamadaha digniin u ah dhul-siibad

- Albaabada ama daaqadaha oo isku dhega ama furmi waaya markii ugu horeysay.
- Dildilaacyo cusub ayaa ka soo baxo talbiista, marmarka, labanka ama aasaaska guriga.
- Derbiyada, jidka lugta ama jaranjarooyinka dibadda ayaa bilaaba inay ka fogaadaan dhismaha.
- Dildilaacyo si tartiib ah u sameysmaya oo sii weynaanaya ayaa lagu arkaa dhulka ama aagaga la sibiidheeyay.
- Khadadka adeegyada ee dhulka hoostiisa mara sida biyaha ayaa jaba.
- Dhul fuursan ama sare u kacsan ayaa lagu arkaa salka tiirta/hoobadka.
- Biyo ayaa ka soo yaaca oogada dhulka.
- Boodka/dayrka, derbiyada xejinta, tiirarka adeegyada sida korontada ama dhirta ayaa janjeedhsama ama dhaqaaqa.

- Waxa aad maqlaysaa sanqadh guux ah oo khafiif ah oo sii kordhaysa marka dhul-siibadku soo dhawaado. Dhulku waxa uu u foorarsadaa hoos oo ah hal jiho oo gaar ah waxana laga yaabaa inuu u dhaqaaqo jihadaas cagahaaga hoostooda.

## Marka uu socdo dhul-siibad.

### Haddii aad ku jirtid gudaha dhisme:

- Joog gudaha.
- Ku gabo miis ama farniijar kale oo adag.

### Haddii aad joogtid dibadda:

- U carar dhulka sare ee ugu dhow oo ah jiho kaa fageynaysa wadada dhul-siibadka.
- Haddii dhagaxaan iyo burbur kale soo socdaan, u carar gaboodka ugu dhow sida koox dhir ah ama dhisme.
- Haddii baxsasho aanay suurtoagal ahayn, iska dhig kubad xoog isugu duuban oo badbaadi madaxaaga.

## Ka dib dhul-siibad

- Xusuuso fatahaad biyo ayaa dhici kara ka dib qulqul dhoobo ama dhul-siibad.
- Ka fogow aagga dhul-siibadka; waxa laga yaabaa inay jirto halis ah siibashooyin kale.
- Dadka dhaawacmay ama meel qabsatay ka fiiri aagga siibashada. Sii gargaarka koowaad.
- Xusuuso inaad gargaartid deriskaaga laga yaabo inay u baahan yihiin gargaar gaar ah – ilmaha yaryar, waayeelka, iyo dadka ah naafo.
- Raadyo ku shaqeeya baytari ama telefishan ka dhegayso macluumaadka xaaladda degdegga ah.
- Fiiri khadadka adeegga sida korontada oo waxyeelo soo gaadhay. Wixii waxyeelo ah u soo sheeg shirkadda adeegga.
- Aasaaska guriga, qiiq-saaraha, iyo dhulka agagaarka ka fiiri waxyeelo soo gaadhay.
- Dhulka waxyeelo soo gadhaay sida ugu dhakhsaha badan dib ugu beer dhir. Nabaadguurka uu keeno lumista daboolka dhulka sida dhirta waxa uu keeni karaa daad degdeg ah.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-039  
Somali